# Qaabka macluumaadka Wilma-da loogu sameysto nidaamka isqoonsiga ee Suomi.fi

**Waxqabadka naadiga galabtii waxaa laga codsadaa Wilma-da. Si aad u codsato waxaad u baahantahay inaad haysato macluumaadka aad Wilma-da ku isticmaali karto. Markaad mas'uulka ilmaha tahay waxaad ku sameysan kartaa macluumaadkaas adigoo isticmaalaya hagitaankan laga bilaabo 11.3.2024.**

Macluumaadka Wilma-da lagu isticmaalo waxaa lagu sameystaa nidaamka isaqoonsiga ee Suomi-fi, markaasna waxaa macluumaadka waalidka ilmaha laga soo saartaa xafiiska diwaanka dadwaynaha (Digi- ja väestötietovirasto). Haddii aad haysatay macluumaad hore oo Wilma-da aad ku isticmaali jirtay, kaas ayaad ku soo lifaaqan kartaa ilmahaaga dugsiga bilaabaya.

Si aad macluumaadkaas isticmaalka u samaysato waxaad u baahantahay cinwaan iimayl oo shaqaynaya iyo macluumaadka bangiga ama macluumaadka aqoonsiga ee moobilka (mobiilivarmenne). Haddii aanad lahayn fursad aad macluumaadka isticmaalka ku samaysato adiga oo hagitaankan tixraacaya, fadlan la soo xidhiidh xoghayaha dugsiga ilmahaaga.

Markaad macluumaadka Wilma-da samaysanayso, ka isticmaal Wilma-da bogga internetka ah hana ka isticmaalin aaladda Wilma-da.

Hoos waxaa lagu qoray hagitaanka labo xaaladood oo kala duwan ah:

A. Samaysashada macluumaadka isticmaalka Wilm-da ee cusub, haddii aanad hore u lahayn macluumaadka Wilma-da laga isticmaalo oo magaalada Helsinki aad ka heshay
B. Dugsiga ilmaha bilaabaya oo lagu lifaaqayo brofaylka isticmaalaha oo hore aad u haysatay.

## A. Samaysiga macluumaadka isticmaalka Wilma-da ee cusub

(Hore umaad haysan macluumaadka isticmaalka Wilma-da ee magaalada helsinki)

1. Gal cinwaanka ah https://helsinki.inschool.fi/connect, haddii ilmahaagu uu wax ka barto dugsi magaalada Helsinki ah ama gal cinwaanka https://yvkoulut.inschool.fi/connect, haddii ilmahaagu uu wax ka barto dugsi barayfat ah ama dowladdu leedahay.

2. Ku qor cinwaankaaga iimaylka booska loo qabtay waxaanad riixdaa **Lähetä varmistusviesti** meesha ay ku qorantahay. Cinwaankan iimaylka ayaa hadda kaddib noqonaya cinwaanka aad Wilma-da ku galayso.



3. Waxaad gashaa iimaylkaaga, waxaanad furtaa farriinta Wilma-da lagaaga soo diray iyo linkiga ku jira. In farriintu ku soo gaadho waxaay qaadan kartaa daqiiqado badan. Haddii aad farriin ku heli waydo iimaylkaaga, la soo xidhiidh dugsiga ilmahaaga. Marka hore waxaa fiican inaad ka hubiso in farriintu aanay ku dhicin sanduuqa qashinka ee iimaylkaaga.




4. Linkiga iimaylku wuxuu dib kuugu celinayaa Wilma-da, halkaas oo aad ka sii wadan karto samaysiga macluumaadka isticmaalka markaad riixdo **Seuraava** meesha ay ku qorantay.




5. Valitse asiointikoulu meesha ay ku qorantahay waxaad liiska ku yaalla ka dooratаa dugsiga ilmahaaga waxaanad riixdaa **Seuraava.**
Dugsiyadu waxaay u kala horreeyaan sida xarfuhu ay alfabeetka ugu kala horreeyaan.



6. Waxaad iska aqoonsan kartaa bogga Suomi-fi waxaad riixdaa **Siirry tunnistautumiseen** meesha ay ku qorantahay.
(Riix meesha Ohita ay ku qorantahay kaliya haddii aad haysato lambarada furaha ah)




7. Ku gal cinwaanka bangigaaga ama aqoonsiga moobilka.




8. Meesha laga hubinayo macluumaadka shaqsiga markaad gaadho ee ah Henkilötietojen tarkistaminen waxaad riixda **Jatka palveluun** meesha ay ku qorantahay. Haddii macluumaadkaagu aanay kuu saxsanayn, waxaad la xidhiidhaa xafiiska diiwaanka dadweynaha (Digi- ja viestintävirasto) waaxdiisa macluumaadka dadwaynaha (Väestötiedot): Taleefan: 0295 536 220.



9. Markaad joogto bogga ay ku qorantahay Wilma- tunnukset/Avainkoodit, waxaad doorataa ”huoltajatiedot saatavilla Digi- ja väestötietoviraston kautta” waxaanad riixdaa Hae huollettavasi meesha ay ku qorantahay.




Haddii mamnuuca ammaanku uu kuu diido inaad iska aqoonsato, waxaad doorataa meesha ”avainkoodi” ay ku qorantahay waxaanad ku qortaa lambarka furaha ah ee dugsigu uu ku siiyay. Waxaad la xidhiidhaa xoghayaha dugsiga ilmahaaga, haddii aqoonsashada culus ama lambarka furaha aha aanu kuu shaqaynin.

10. Dooro ilmahaaga aad rabto inaad ku darsato macluumaadkaaga isticmaalaha Wilma-da. Waxaad riixdaa **Valitse ja siirry asiointipalveluun** meesha ay ku qorantahay (meeshaas waxaay isku baddalaysaa aktif, marka aad ilmahaaga doorato).



11. Waxaad ku soo noqonaysaa bogga Wilma-tunnukset/Avainkoodit waxaanad ka arkaysaa ilmahaaga aad ku darsatay meesha Roolit ay ku qorantahay. Hore u sii soco oo taabo **Seuraava** meesha ay ku qorantahay.




12. Bogga Käyttäjän tiedot markaad gaadho riix **Seuraava** meesha ay ku qorantahay.




13. Bogga Salasana uu ku qoranyahay markaad gaadho ku qor eray sir ah oo aad dooratay adigu waxaanad ku qortaa meelaha ay ku qorantahay Salasana iyo Toista salasana. Erayga sirta ah ee aad dooranayso waa inuu ka koobnaadaa ugu yaraan 8 calaamadood oo saddex nooc iskugu jira: xarfaha wawayn, xarfaha yaryar, lambaro ama calaamadaha gaarka ah ee kale (sida calaamadda hakadka, calaamadda su’aasha iyo calaamadda kor u dhawaaqa tilmaamta). Markaas kaddib waxaad riixdaa **Seuraava** meesha ay ku qorantahay.



14. Bogga Tunnuksen tiedot ay ku qorantahay markaad soo gaadho hubi in macluumaadkaagu kuu saxanyihiin waxaanad riixdaa **Luo tunnus** meesha ay ku qorantahay.




15. Waxaad helaysaa ogaysiis sheegaya in macluumaadkaaga isticmaalaha inaad samaysato inaad ku guuleysatay. Waxaad ku gali kartaa Wilmada macluumaadkaaga.
Marka hore riix ”Takaisin etusivulle” meesha ay ku qorantahay, si aad dib ugu noqoto bogga Wilma-da laga galo.




16. Wilma-da gal oo ku qor cinwaankaaga iimaylka Käyttäjätunnus meesha ay ku qorantahay eraygaaga sirta ahna wxaad ku qortaa Salasana meesha ay ku qorantahay waxaanad riixdaa **Kirjaudu sisään.**




## Haddii aad ku dhibaateysantahay samaysiga macluumaadka isticmaalaha Wilma-da

Haddii samaysiga macluumaadka isticmaaluhu aanay kuu hagaagin, waxaad la xidhiidhaa xoghayaha dugsigaaga.

Haddii macluumaadkaagu aanay kuu saxsanayn, waxaad la xidhiidhaa xafiiska diwaanka dadweynaha

(Digi- ja viestintävirasto) waaxdiisa macluumaadka dadwaynaha (Väestötiedot):
Taleefan: 0295 536 220, isniin- jimce saacadda 9–15.

Talobixin waxaa laga heli karaa telefoonka Barbaarinta iyo Waxbarashada adeegooda hagitaanka ah:

Lambarka taleefanka: +358 9 310 44986, isniin-jimce saacadda 10–12 ja 13–15

## B. Dugsiga ilmaha bilaabaya oo lagu lifaaqayo brofaylka isticmaalaha oo hore aad u haysatay.

Haddii aad ku lahayd macluumaadka isticmaalaha Wilma-da magaalada Helsinki, waxaad isla cinwaankaas ku darsan kartaa ilmo kale.

1. Waxaad Wilma-da ka gashaa cinwaanka http://helsinki.inschool.fi.
   Waxaad furtaa Käyttöoikeudet (waxaad ka heli kartaa bogga qaybtiisa ore ee midigta ah meesha ay ku qorantahay Asetukset )




2. Qayba Roolien lisääminen waxaad ka riixdaa **Lisää rooli** meesha ay ku qorantahay.




3. ”Valitse asiointikoulu” meesha ay ku qorantahay waxaad liiska ku yaalla ka doorataa dugsiga ilmahaaga waxaanad riixdaa **Seuraava.**



4. Waxaad iska aqoonsan kartaa bogga Suomi-fi waxaad riixdaa Siirry tunnistautumiseen meesha ay ku qorantahay.




5. Ku gal cinwaanka bangigaaga ama aqoonsiga moobilka.




6. La soco hagitaanka illaa aad ku soo noqonaysa Wilma-da iyo bogga Wilma-tunnukset/Avainkoodit. Waxaad doorataa ”huoltajatiedot saatavilla Digi- ja väestötietoviraston kautta”. Waxaanad riixdaa ”Hae huollettavasi” meesha ay ku qorantahay.




Haddii mamnuuca ammaanku uu kuu diido inaad iska aqoonsato, waxaad doorataa meesha

”avainkoodi” ay ku qorantahay waxaanad ku qortaa lambarka furaha ah ee dugsigu uu ku siiyay.

7. Raac hagitaanka waxaanad buuxbuuxisaa macluumaadka loo baahanyahay, illaa ilmahaaga lagu daray macluumaadkaaga isticmaalaha ee Wilma-da. Haddii loo baahdo waxaad hagitaanka faahfaahsan ka eegtaa qaybta A qodobka 10 laga bilaabo.

## Haddii aad ku dhibaateysantahay samaysiga macluumaadka isticmaalaha Wilma-da

Haddii samaysiga macluumaadka isticmaaluhu aanay kuu hagaagin, waxaad la xidhiidhaa xoghayaha dugsigaaga.

Haddii macluumaadkaagu aanay kuu saxsanayn, waxaad la xidhiidhaa xafiiska diwaanka dadweynaha (Digi- ja viestintävirasto) waaxdiisa macluumaadka dadwaynaha (Väestötiedot):
Taleefan: 0295 536 220, isniin- jimce saacadda 9–15.

Talobixin waxaa laga heli karaa telefoonka Barbaarinta iyo Waxbarashada adeegooda hagitaanka ah:
Taleefan lambarka: +358 9 310 44986, isniin-jimce saacadda 10–12 iyo 13–15

# Qaabka booska naadiga galabtii loogu dalbado Wilma-da

Macluumaadka la xidhiidha waxqabadka naadiga galabtii waxaad ka heli kartaa bogga hel.fi/iltapaivatoiminta.

Muddada codsiga naadiga galabtii ee sannad-dugsiyeeda 2024–2025 waa 11.3.–17.4.2024.

Boosaska naadiga galabtii waxaa laga raadsan karaa oo wax laga baran karaa hel.fi/iltapaivatoimintapaikat ama Khaariddada adeegga ayaad ka heli kartaa markaad ku raadiso magaca ”iltapäivätoiminta”.

Waxqabadka naadiga galabtii waxaa laga codsadaa Wilma-da. Haddii mas’uulku aanu wali haysanin macluumaadka Wilma-da lagu isticmaalo, waxaa hagitaanka lagu samaysan karo macluumaadkaas laga heli karaa: hel.fi/wilma.

Fiiro gaar ah! Foomka codsiga ee Wilma-da ku jira waxaad ka dooran kartaa goobaha naadiga galabtii ee dugsiga u dhow meesha kuugu habboon, halkaas ayaanad booska ka codsan kartaa. Haddii aad rabto inaad booska ka codsato meel kale oo Helsinki ku taalla, waxaad isticmaashaa foomka codsiga ee PDF:ka ah. Waxaad kaas ka heli kartaa bogga hel.fi/iltapaivatoiminta.

**Qaabka Wilma-da looga codsado waxqabadka naadiga galabtii**

1. Gal Wilma-da (https://helsinki.inschool.fi).Waxaad isticmaashaa bogga internetka ah, ha isticmaalin aaladda taleefanka ee Wilma-da.

2. Haddii ay dhowr ilmo kuugu jiraan Wilma-da, dooro qofka aad ka diwaangalinayso naadiga galabtii.

3. Waxaad Wilma-da qaybteeda kore ka doorataa ”Codsiyada iyo go’aamada”.




4. Dooro ”Tee uusi hakemus”




5. Dooro ”Iltapäivätoimintaan hakeminen”.

6. Ku buuxi macluumaadkaaga codsiga markaasna xaree.

7. Sug go’aanka. Dadka soo codsaday muddada codsiga lagu jiro go’aanadooda waxaa boostada loogu dirayaa bisha Juun. Muddada go´aamada la diyaarinayo macluumaad ku saabsan boosaskaas lama heli karo.

Muddada codsigu uu jiro dadka soo codsaday ee dhigta fasalada 1.-2. waa la siinayaa booska naadiga galabtii. Haddii booska lagaaga waayo goobta waxqabadka ee aad codsatay, ilmahaaga waxaa ugu horrayntii boos laga siinayaa goob kale oo waxqabad oo ku taalla nawaaxiga aad ku nooshahay.

Muddada codsigu markuu dhamaado codsiyada la soo dirsado waxaa la falanqaynayaaba intaanan sannad-dugsiyeedka la bilaabin waxaana lagu qiimeynayaa xaaladda boosaska. Haddii aad soo codsanayso muddada codsiga kaddib, booska helitaankiisu ma aha hubaal.